ALLIANCE ACTion

INFORMATION SHEETS

# Waxbarashada Gaarahaaneed: Qiimeynta

**Special Education: EVALUATION — Somali version**

Inta aan ilmahu helin waxbarashada gaar ahaaneed ama qorsho la xiriira, waa in ilmaha la qiimeeyaa. Qiimeyntu waxay hubinaysaa in ilmahu u baahan yahay waxbarashada gaar ahaaneed. Waalidka ama qof ka mid ah shaqaalaha dugsiga ayaa codsan kara qiimeyta. Waalidka ilmaha waa in uu bixiyaa ogolaanshada hore iyadoo qoraal ah. Qiimeynta waxaa ka mid noqon kara: warbixinta waalidka, imtixaano lagu qiyaaso ilmaha, tuhun caafimaad haduu jiro, iyo warbixin shir lala shira waalidka iyo dugsiga. Qiimeyntu waa in ay ahataa:

- mid dhameystiran ee uu qof tababaran qaadayo;
- dhan walba oo lagu tuhmayo in ilmahu la'yahay;
- qiimeyn badan ee aan eheyn hal imtixaan keliya;
- mid luqadda hooyo ee ilmahu ku hadlo haddii ay suurowdo;
- mid aan leheyn midab takoor ama dhaqan takoor.

## Su'aalaha waalidku weydiin kara shaqaalaha dugsiga xagga qiimeynta ilmaha waxaa ka mid ah:

1. Maxaad ugu baahan tahay in aad u qiimayso ilmahayga?
2. Maxay kula tahay in aad ku ogaaneyso qiimeynta ilmahayga?
3. Imtixaan noocee ah ayaa laga qaadayaa ilmaha? Xageena laga imtixaamayaa?
4. Imtixaanku miyuu midabtakoorayaa ilmhayga? Miyuu dhaqan takoorayaa? Miyuu laxaad la'an takoorayaa?
5. Sidee baad ku ogtahay in imtixaannadu midab sooceyn ilmahayga?
6. Maxaa dhacaya hadaan ilmahayga la qiimeyn? Miyey weli helayaan caawimaadda ah xagga waxbarashada oo aanu isla garanay in ilmaheygu u baahan yahay?
7. Goormaan helayaa natiijyada qiimeynta iyadoo qoraal ah.?
8. Maxaan qaban karaa haddaanan kugu raacsaneyn natiijyada qiimeynta?

## Haduu ilmahu dhibaato ku qabo dugsiga, xagga adaabta, Sua'alahan hoos ku qoran waa kuwa ku caawini kara:

1. Ilmahaygu ma u baahan yahay qiimeynta dabeecadda aasaasiga "functional behavioral assessment?" Sababta uu ugu baahan yahay ama uusan ugu baahneyn maxay tahay? Qiimeynta dabeecadda aasaasiga waxaa lagu eegaa sababta ku kalifaysa ilmaha aqlaaq xumada.
2. Maxay tahay habka dhexdhexaadinta wanaagsan ee tusaalo loo tusayo? Miyey ka caawisaa aqlaaq darrada ilmahayga? Maxaan kaloo qabannaa?

## Hadduu waalidku ku qanacsaneyn natiijyada qiimeynta ilmahooda ee dugsigu la yimaaday, waxay sameyn karaan sida soo socota:

- In uu qof kale ee qorshaha dugsiga ka madax bannaan dib u qiimeeyo ilmaha. Tani waxaa loo yaqaan Qiimeynta Madax Banaan ee Waxbarashada (Independent Education Evaluation) (IEE)};
- In waalidku caawiyaan dugsiga oo ay cod ku yeeshaan doorashada qofka qiimeynta sameynaya. (Qofkaasi waa in uu lahaadaa aqoonta la iska doonayo);
- In ay waalidku wax lacag ah uga bixin qiimeynta ay ku sameynayaan dugsiga dibaddiisa.

* Degmada dugsiga waa in ay u ogolaataa waalidka in ilmaha lagu qiimeyaa dugsiga dibadiisa iyadoo lacag la'aan ah, ama ay shir ku muujisaa in qiimeyntii hore oo uu dugsigu sameyay tahay mid ku haboon ilmaha baahidooda.

Technical Assistance ALLIANCE for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org



©2007 PACER Center | ALLIANCE ACTion Sheet: ALL-10so

ALLIANCE ACTion INFORMATION SHEETS

# Waxbarashada Gaar ahaaneed: Dib u Qiimeynta

**Special Education: REEVALUATION — Somali version**

Haddii uu ilmahu horey u lahaa qorsho waxbarashada gaar ahaaneed, waa in dib loo sii qiimeeyaa si loo eego in ay weli u baahan yihiin waxbarashada gaar ahaaneed iyo in waxyaabo cusub ku soo siyaaday baahidooda. Dib u qiimeynta ma dhici karto hal mar ka badan sanadkii, in waalidka iyo degaanka dugsiga isla gartaan in mid kale loo baahan yahay moyee. Ilmo walba waa in la qiimeeyaa sadaxdii sanaba mar, in waalidka iyo degaanka dugsiga isla gartaan in aan loo baahneyn qiimeyntaa moyee. Ujeeddada qiimeyntu waa:

- in la hubsado in ilmuhu weli u baahanyahay waxbarashada gaar ahaaneed iyo qorshaha la xiriira.
- in lagu ogaado halka ilmahu ka marayo waxbarashada iyo in uu leeyahay baahi dheeraad ah xagga waxbarashada
- in la isla garto in ay ilmahu u baahanyihiin in qorshahooda waxbarashada gaar ahaaneed wax laga bedelo:
  - ✓ si ay u gaaraan halki laga filayay dhamaadka sanad dugsiga sida lagu qeexay qorshaha waxbarashadooda.
  - ✓ in ay ka qeyb qaataan manaahijta caadiga ah ee loogu tala galay dugsiga hadii ay ku haboontahay.

**Dib u qiimeynta micnaheedu ma'aha oo keliya in ilmaha imtixaanno badan dib looga qaadayo.** Haduu waalidku codsado dib u qiimeyn iyadoo qoraal ah, si uu u ogaado in ilmahiisu horumar gaarayo ama u baahan yahay waxqabad dheeraad ah, amaba la gaaray qiimeyntii sadexda sanaba mar aheyd, qof ka socda dugsiga ayaa laga yabaa in uu isugu yeero koox waalidka la shira si loo falanqeeyo loogana wada hadlo xaaladda ilmaha. **Waalidka ilmaha waa qeeb ka mid ah kooxda,** sida badanna talalaabooyinka hoos ku qeexan ayaa la khaataa:

1. Kooxda waxay dib u eegeyaan natiijyada imtixaannada ilmaha laga qaaday iyo waxii kale oo warbixin ah oo ku saabsan ilmaha ee dugsigu ka helay waalidka. Dib u eegista waxaa kaloo la qadarinayaa, warbixinta baraha ama shaqaalaha u xil saaran indha indheenta ilmaha iyo xaaladda xagga fasalka ee ilmahu ku sugan yahay markaa. Kooxda ayaa talo ku gaaraysa in loo baahan yahay warbixin dheeraad ah si go'aan looga gaaro.
2. Kooxda waxaa kale oo ay qadarineysaa, in imtixaanno siyaada ah loo baahan yahay si loo ogaado in ilmahu weli u baahan yahay in uu sii wataa waxbarashada gaar ahaaneed iyo howlaha la xiriira. Kooxda waxay kaloo qadarin kartaa, in loo baahan yahay waafajin ama hab doorin (accommodations or modifications) si ilmahu u gaaraan natiijyadii ku xusneed qorshahooda waxbarashadda gaarka ah. Tasoo u ogolaaneysa in ay ka qeyb qaataan manaahijta caadiga ah ee dugsiga u deggan.
3. Dugsiga waxuu wargelinayaa waalidka iyadoo qoraal ah go'aannada uu gaaray iyo sababta uu ku gaaray go'aannadaa.
4. Hadii ay kooxdu tuhmeyso in ilmahu u baahan yahay imtixaanno dheeraad ah, waa in waalidku bixiyaa ogolaansho iyadoo qoraal ah inta aan imtixaannadaa la bilaabin. Hadii aysan waalidku ku racsaneyn dugsiga in ilmahoodu u baahanyahay imtixaannadda siyaadada ah, dugsigu ma imtixaami karo ilmaha. Dugsiga waxuu ogolaansho waalidka kaga heli karaa, in uu xugsado siyaabo dhexdhexaadin ah. Haduu sharciga gobolka ka mamnuucayo dugsiga in dib u qiimeeyo ilmaha isagoon ka helin waalidka ogolaansho qoraal ah, dugsigu ma qiimeyn karo ilmahaa.
5. Hadii ay kooxdu isku raacdo in ilmaha dib ugu baahneyn waxbarashada gaar ahaaneed, waalidku wuxuu xaq u leeyahay in uu dugsiga ka codsado in dib loo qiimeeyo ilmahooda. Dugsiguna waa in uu la socodsiiyaa waalidka in ay xuquuqdaa leeyihiin.
6. Waalidku waxay dabadeed weydiin karaan kooxda, su'aalahii ay hore u weydiiyeen marki ugu horeysa ee ilmaha loo qiimeynayay waxbarashada gaarka oo aan kor ku soo xusnay.

Technical Assistance ALLIANCE for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org
www.taalliance.org